

Cusboonaysiinta iyo Gudbinta Sanad Kasta Macluumaadka Xaaladda Deg Degga ee Kumbuyuutarka(horey u ahaa kaar caafimaad xaaladda degdegga oo cagaaran laguna qorijirey gacanta)

1. Marka hore gal Kumbuyuutarka qaybta loo yaqaan Infinite Campus Parent portal adoo ka samaysanaya meel kuu khaas ah ama bar aad leedahay.
2. Waxaad “riixdaa” dhanka bidixda shaashada “Annual Update or New Students “. (Haddii ay dhowr caruur ah kuu dhigtaan degmada, mid ka dooro marka hore.)
3. Dhanka bidixda shaashada kor, waxaad riixdaa batoonka “Click Here to Go to Existing Student Registration.”
4. Waxaad riixdaa batoonka “Begin Registration.”
5. Ansixi barta aad samaysatay oo riix batoonka “submit”. Kanu wuxuu ku tusayaa macluumaadkii hore ee aad ku samaysatay infinite kambaska(Infinite Campus).
6. Raac lixda talaabo ee xiga siday isugu xigaan. Shaashad cusub oo kasta waxay yeelan-doontaa macluumaad midabka huruuda leh (Yellow) kaasoo u baahan in la hubiyo oo la saxo (la xaqiijiyey ama La beddeley). Waxaad u baahan-doontaa inaad riixdo batoonka “edit” si markale loo hubiyo macluumaadka. Waxaad riixdaa batoonka “next” si aad u aado shaashada ku xigta. Waxaad u baahan-doontaa inaad riixdo “save and confirm” si aad u kaydiso ama u seyfgarayso (save) macluumaadkii socday oo dhan.
7. U gudbi macluumaadka si kama damayn ah.
8. Ka bax ama xir bartaada Infinte Campus.